



Kahortaga Wasaqda Ganacsiyada Gaariyaasha

Barnaamijka *Ilaalinta Waraha Biyaha ee Ismaamulka San Diego* ayaa ka taageeraaya ganacsiyada dedaaladooda kahortaga wasaqda asagoo siinaaya Farsamooyinka ugu fiican ee Maamulka Biyaha Daadka (BMP-yada).

! Biyaha lagu siidaayo wadooyinka, majroorada, iyo biyaha daadka roobka ee Ismaamulka San Diego AYAAN LA DAAWAYN kahor intaysan gelin waraha deegaankeena, webiyada, iyo badwaynta. Dhammaan ilaha wasaqda ayaa mamnuuc ka ah inay ka baxaan gurigaaga ayna galaan biyaha wadooyinka ama daadka roobka. Keliya biyaha roobka ayaa loo oggol yahay inay maraan wadooyinka iyo kanaallada daadka. *Tilmaamahaan kahortaga wasaqda ee ganacsigaaga gaariyaasha ayaa naga caawin doona nadiifinta marinadeena biyaha.*

Maaraynta DHeecaanka Gaariyaasha

- ☐ Kaydi, maaree, oo qashinka kudar olo garaasada, saliida wasaqda ah, iyo dareerayaasha si waafaqsan dhammaan sharciyada iyo xeerarka quseeya.
- ☐ Ku daadi dareerayaasha gaariga gudaha ama meelo daboolan.
- ☐ Dareerayaasha mari sagxadaha aan lahayn meelo wasaqda qabta sida meelaha shubka ah.
- ☐ Adeegso baafka la hoos gasho biyaha dhibcaaya, qasacyo, ama qaabab kale oo xameynta dhibcaha iyo daadashada biyaha wasaqda ah.
- ☐ U adeegso baafka wasaqda dhibcaysa qabta hoosta gaariyaasha baakiman iyo kuwa la ogyahay in wax ka da'ayaan.
- ☐ Isla markaba dheecaanka ka shub gaariyaasha la xareeyay ama shaqo gabka ah si looga hortago dareerka iyo daashada qashinka.
- ☐ Ku shub dareerayaasha gaariyaasha qasacyo gaar ah, oo xiran, oo aan waxba ka daadan karin.

Dhaqsita Gaariga iyo Qalabka

- ☐ La xariir wakaaladaha bulaacada ee degaankaaga si ay kuu siiyaan xogta daadinta bulaacada wasaqda ah. Miireyaasha iyo nidaamyada sifaynta biyaha wasaqda ah ayaa lahaan kara shuruudaha bulaacad fogaynta oo gaar ah.
- ☐ Ku dhaq gaariyaasha aagag gaar ah oo ka fog aana wasaqda ku shubayn marinada biyaha roobka ama waraha biyaha.
- ☐ Adeegso agabka buufinta iyo istiraashooyin si aad biyaha u dhaqaalayso aadna u yarayso biyaha daadka wasaqda ah.
- ☐ Adeegso xarunta gaari dhiqista ganacsiga ah haddii aadan buuxin karin heerarka ugu hooseeya ee halkaan lagu sheegay.

waan
difaaci karnaa
marinadeena biyaha

ayadoo la qaadayo keliya
dhawr talaabo.

tilmaamo dheeraad ah >>>



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.



Nadiifinta Matoorka iyo Qaybaha Gaariga

- ☐ Ku dhaq qaybaha gaariga keliya meelaha loo asteeyay ee gudaha aaga shaqada.
- ☐ Ku nadiifi qaybaha siiman gaar ah ama fuustooyin marka aad isticmaalayso dareereyaal la qasay.
- ☐ Kormeer aagaga dhiqitaanka gaariga maalin kasta si aad uga eegto meelo dilaacay oo samee dayactir degdeg ah.
- ☐ Ku daadi dheecaanka wasaqda aad ka dhaqday agabka siinka ama fuustada wasaqda.
- ☐ Dib u sifee biyaha ka yimaada shaqooyinka nadiifinta ama dhiqitaanka cadaadiska loo adeegsado.

Dayactirka iyo Riijiga Dusha

- ☐ Ku samee shaqada gudaha xarun kor ka daboolan. Qaad tallaabooyin kahortag ah si aad uga hortagto bulaacada ka timaada aagaga shaqada marka aan shaqada gudaha meel suuragal ahayn.
- ☐ Adeegso mashiin leh nidaamka buufinta boorka si busta loogu qabto meesha ay kasoo baxday.
- ☐ Ku samee riinjiiyaynta aag la ogol yahay, oo xiran lehna agabka haawinta iyo sifaynta.
- ☐ Waydii wakaaladaada maxaliga ah ee dabka, Waaxda Agabka Khatarta ah ee Ismaamulka San Diego, iyo Maamulka Xakamaynta Wasaqda Hawada si ay kuu siiyaan xog dheeraad ah iyo shuruudaha ruqsada ee agabka wax buufiya, dahaara, iyo qashin saarka.

Sagxadaha iyo Dusha Meelaha la Baneeyay

- ☐ Adeegso qaababka qalalan sida xaaqida iyo hawo marinta si aad u nadiifiso busta iyo xashka.
- ☐ Keliya adeegso qaababka qalalan si aad u nadiifiso agagz shidaanku galo.
- ☐ Adeegso nidaamka sadexda tirtire:
 - a. Ka ilaali saliid kasta oo daatay adeegsanaaya tirtire ka samaysan hydrophobic (maro saliida dhuuqda) kadibna ku majuuji saliida sakeelka ay ku qoran tahay "Keliya U adeegso Saliida" kadibna qashinka ugu dar sida ku haboon.
 - b. Tirtir agabka kahortaga damista gaariga adoo adeegsanaaya tirtire caadi ah kadibna ku majuuji baaldiga ay ku qoran tahay "U adeegso Qaboojiyaha Keliya" kadibna qashinka ugu dar sida ku haboon.
 - c. Adeegso tirtir caadi ah iyo sakeel ay ku jirto saabuun si aad ugu samayso tirtirsta ugu danbaysa kadibna si sax ah qashinka u daadi. Waydii wakaaladaha bulaacada ee degaankaaga si ay kuu siiyaan xogta daadinta bulaacada wasaqda ah.

Tababarka Shaqaalaha

Tababar dhammaan shaqaalaha si ay uga shaqeeyaan nidaamka BMP-yada biyaha roobka, kahortaga wasaqda, iyo nadiifinta waxa daata

Ku hayso diiwaannada tababarka goobta

Si aad u hesho xog dheeraad ah iyo fikrado kale, waydii wakaaladaha maxaliga ah ee caafimaadka iyo bulaacada, ka fiiri waraaqaha wararka ee ururka ganacsiga, iyo joornaallada.

! Ku siidaynta wasaqda si toos ah ama si dadban nidaamka biyaha daadka ama marinnada biyaha waxay kasoo horjeeda Xeerka Ilaalinta warta biyaha ee Ismaamulka (WPO). **Ganacsigaaga waxaa laga doonayaa inuu ku dhaqmo WPO iyo shuruudaha kore ee ugu yar ee BMP-yada.**

waad ku mahadsan tahay

inaad doorkaaga ka qaadatay difaacida kanaaladeena biyaha.



Haddii aad u baahan tahay xog dheeraad ah, wac Laynka Tooska ah ee Daadka Biyaha (888) 846-0800 ama booqo www.sandiegocounty.gov/stormwater ee WPO.

Macluumaadyo Dheeraad ah

Adeegga iyo Dayactirka Gaariga (VSR):

<https://dtsc.ca.gov/dtsc-website-archive/vehicle-service-and-repair-vsr/>